

Qoysaska DPS ee qaaliga ahoow:

Waxaan higsanaynaa aduunyo dugsi kasta oo DPS kuyaala ay haystaan waxay ubaahanyihiin si ay utaageeraan higsigeena: kaasoo ah in Cunug kasta Guulaysto. Si aan higsigaan ugaarno, waa inaan siijoogto ah meesha uga saarna caqabado kasta oo hortaagan guusha ardayda. Kawaalidka ardayga naafada ah ahaan, waxaan doonaynaa inaan kula wadaagno qaar kamid ah macluumaadka kusaabsan higsigeena waxbarashada gaarka ah ee Denver Public Schools aana kugu casuuno inaad nalawadaagto fikradaha aad kaqabto taageerooyinkeena.

Sanad dugsiyeedkaan nadhaafay, waxaan ogaanay in macalimiinteena waxbarashada gaarka ah ay aad muhiimada usiinayeen arimaha laxariira habdhaqanka, taasoo kahor istaagaysay inay taageeraan ardayda waxbarashada gaarka ah kujirta.

Kadib marka wadahal xoogan kayeelanay bishii Janaayo, waxaan ugu danbayn iskuraacnay inaan dib uhabayn kusamayno kooxdeena Sinaanta iyo Fursadaha Ardayga, kuwaasoo adeegyo taageero ah siiya dhamaan ardayda, ayna kujiraan ardayda naafada ah. Qaar kamid ah isbadalada ugu waawayn waxaa kamid ahaa:

- Inaan xaqiijino in dhamaan dugsiyadu helaan Khabiir dhanka Casharada Waxbarashada Gaar ah si ay caruurta ubaraan casharo gaar ah, kor uqaadista tayada dugsiyada iyo in macalimiinta laga taageero iyo shaqaalaha waxbarashada gaarka ah;
- Inan kor uqaadno maaliyada qorista shaqaale dheeri ah oo lodiyaarsho barnaamijyada Baahiyaha Aasaasiga ah (AN) ee xarumaha laga bixiyo; iyo
- Inaan wareejino qarashaadka xafiiska dhexe ee guud qaarkood maalgalinta xafiiska dugsiyada si markaas madaxda dugsiyada hoose ay ukordhiyaan tirada saacadaha shaqaalaha bulshada ee dugsiyada ama dhakhtarka nafsiga ee dugsiyada ay shaqeyan si ay ardayda uga taageeraan caqabadaha dhanka habdhaqanka.

Waxaan iskuwaafaqnay inay jiraan walaacyo ku aadan waqtiga aan isbadaladaan kuwargalinay bulshada laakiin waxaan bayaankaan xiligaan ugusoo aadinay anagoo xushmaynayna xubnaha saaxiibadeen ah ee xilalkooda ay saamaynta kuyeesheen dib uhabaynadaan. Bayaanka laguma dhawaaqin ilaa dhamaan xubnaha kooxdeena la ogaysiiyay, ayadoo lagusoo daray doodihii ku aadanaa miisaaniyad sanadeedka 2018-19. Waxaan doonaynaa inaan cadayno in **dib uhabaynadaan aan lagu salayn go'aanada miisaaniyada sinabana aysan wax saamayna ugu yeelanayn qarashaadka looqoondeeyay waxbarashada gaarka ah.**

Xaqiiqdii, maalgalinta guud ee degmadu kubixiso waxbarashada gaarka ah way siikordhaysaa, dugsiyadeenuna waxay kafaaiidaysan doonaan qarashaadka dheeriga ah iyo taageerooyinka lasiiindoono waxbarashada gaarka ah. Tusaale, dugsiyada degmada waxaa lagu xoojiyaa qarashaadka si ay ushaqaylaysiiyaan xirfadlayaal si toos ah kuwaasoo loogu talagalay ardayda qaba baahiyaha fudud/dhexdhexaadka ah ee waxbarashada gaarka ah. Ardayda qaba baahiyaha daran, ayna kujiraan ardayda kujira barnamijyada xarumaha gaarka ah, taageerada waxaa loosiimarinayaa isha dhexe ee maalgalinta taasoo ay dugsiyadu helikaraan.

Si aad macluumaad dheeri ah uga ogaato, waxaan kugu casuumaynaa:

- Inaad daawato Muuqaalka Laga duubay Kulankii Gudigga Waxbarashada oo laqabtay bishii Abriil 12, halkaasoo aan macluumaad kabixinay dib uhabaynta socota. Muuqaalka waxaa laga daawan karaa ayadoo labooqanaayo <http://board.dpsk12.org> waxaadna markaas "tos udaawan kartaa Kulankii Gudigga si Toos ah."
- Noogusoo gudbi fikradahaaga ku aadan sida ugu fiican ee aan u adeegsan karno maaliyada waxbarashada gaarka ah seo@dpsk12.org.
- Iskadiiwaangali kulanka gobalka ee xiliga xagaagaha kaasoo looga hadlaayo taageerida ardayda naafada ah adoo booqanaaya <https://studentequity.dpsk12.org/sped-engagement/>.

Waan siiwadaynaa inaan idin lasoo xariirno si aan u aruuriyo fikradaha iyo aaraada qoysaskeena ardayda nafaada ah dugsiyada udhigato Waxaana filaynaa inaad nagala shaqayn doontaan qaabkaan wada shaqayn lahayn abuurista guusha dhamaan ardaydeena - ayna kujiraan ardaydeena naafada ah - ay guuli gaari karaan.

Mahadsanid,

Eldridge Greer, Ph.D
Madaxa Shaqaalaha, Sinaanta iyo Fursadaha Ardayda
Denver Public School